

## **ADA: Habka Dacwadda**

### **ADA: Complaint Process**

Santa Clara Valley Transportation Authority (VTA) waxay u ballanqaaday muwaadiniinta oo dhan inay si isku mid ah u helaan adeegyada gaadiidka.

Habraacan Ashkatada waxa loo sameeyey in la buuxiyo Shuruudaha Xeerka Dadka Maraykan ah ee Naafada ah ee 1990 (“ADA”). Waxa isticmaali kara cid kasta oo rabta inay fayl garaysato dacwad sheegaysa takoor kusalaysan naafonimo bixinta adeegyada, hawlaha, barnaamijyada, ama dheefaha VTA. Siyaasadda Shaqaalaha VTA ayaa lagu maamulaa dacwadaha shaqada la xidhiidha ee takoorka naafada.

### **Fayl Garaysiga Dacwad**

Dacwadda waa in la fayl garaysto intayna dhammaan 180 maalmood laga bilaabo dhacdada takoor ka la soo eedeeyey. Habka la doorbiday waa in lagu fayl garaysto dacwadda qoraal iyada oo la isticmaalayo Foomka Cabashada ADA (hoos ku cad), loona diro:

ADA Coordinator  
Office of Diversity and Inclusion  
Santa Clara Valley Transportation Authority  
3331 North First Street, B1  
San Jose, CA 95134  
(408) 321-2300  
[www.vta.org](http://www.vta.org)

Dacwadaha hadalka ah waa la aqbali doonaa oo qori doona iyada oo lala xidhiidhayo xarunta adeegga macmiilka (408) 321-2300. Dacwadaha sidoo kale waxa laga fayl garaysan karaa cidaha dibadeed sida Maamulka Gaadiidka Fadaraalka ([Federal Transit Administration](http://www.federaltransitadministration.gov)), Guddida U-sinaanta Fursadaha Shaqada ([The Equal Employment Opportunity Commission](http://www.eeoc.gov)), ama Waaxda Shaqaalayn iyo Guryeyn Caddaalad ah ([The Department of Fair Employment and Housing](http://www.doe.gov)). Fadlan dib-u-eeg macluumaadka websaytada hay'adaha la xidhiidha si aad u hesho tafaasiil kusaabsan dacwadaha ADA.

Haddii dacwad laga fayl garaysto isla mar qudha VTA iyo cid dibadeed, dacwadda dibadeed ayaa ka mudnaan doonta dacwadda VTA. Hase yeeshee, VTA waxay sii wadi doontaa baadhitaankeeda dacwadda waxayna soo diyaarin natiijooyinka.

### **Baadhitaanada**

10 maalmood gudahood laga bilaabo helista dacwadda tooska ah, Isu-duwaha ADA wuxuu ogaysiin dacwoodaha wuxuuna bilaabi baadhitaan.

Baadhitaanadu waxay maarayn doonaan dacwadda ka-dhanka ah waax VTA ah. Baadhitaanka waxa lala samaynayaa oo kana talinaya Waaxda Xidhiidhka Shaqaalaha.

Baadhitaanka waxa kujiri kara kala hadal dacwadda dhammaan dhinacyada ay saamayso si loo xalliyo dhibta. Dacwoodaha waxa matali kara qareen ama wakiil kale oo uu isagu soo doortay waxaanu keeni karaa maragyo iyo caddayn inta baadhitaanku socdo.

Baadhitaanka waxa lagu samayn doona oo dhammaystiri doona 60 maalmood gudahood laga bilaabo helista dacwadda tooska ah.

Iyada oo lagu salaynayo dhammaan macluumaadka la helay, warbixin baadhitaan ayuu qori doonaa Isu-duwaha ADA u gudbinta Sarkaalka Madaxa Maamuleed.

Dacwooduhu wuxuu heli doonaa warqad sheegaysa go'aankaas kama-dambaysta ah ee 60 maalmood ah. Baadhitaanada intooda badan waxa lagu dhammaystiraa 30 maalmood gudahood.

Dacwoodaha waa in la ogaysiiyo xaqiisa inuu rafcaan ka qaato go'aanka. Rafcaanada waxa loo qaadan karaa Maamulka Gaadiidka Fadaraalka ([Federal Transit Administration](#)), Guddida U-sinaanta Fursadaha Shaqada ([The Equal Employment Opportunity Commission](#)), ama Waaxda Shaqaalayn iyo Guryeyn Caddaalad ah ([The Department of Fair Employment and Housing](#)).

Dhammaan dacwadaha qoran ee uu helo Isu-duwaha ADA ama wakiilkiisu, waxay rafcaan u qaadan Maamulka Gaadiidka Fadaraalka, Guddida U-sinaanta Fursadaha Shaqada, ama Waaxda Shaqaalayn iyo Guryeyn Caddaalad ah, jawaabaha ka yimaada xafiisyadan waxa hayn doona VTA ugu yaraan saddex sano.

**FOOMKA CABASHADA ADA ([ADA COMPLAINT FORM](#))**

**Foomka Dacwadda Xeerka Dadka Maraykanka ah ee Naafada ah**

**Americans with Disabilities Act Complaint Form**

**Santa Clara Valley Transportation Authority (VTA)**

VTA waxa ka go'an hubinta inaan cidna loo diidin helitaanka adeegyadeeda, barnaamijyadeeda, ama hawlaheega iyada oo lagu salaynayo naafada, sida ku cad title II ee Xeerka Dadka Maraykanka ah ee Naafada ah ee 1990 ("ADA"). Dacwadaha ADA waa in lagu fayl gareeyo 180 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda dhacdada eedaynta.

Macluumaadka soo socdaa wuxuu daruuri u yahay inuu naga kaalmeeyo ka shaqaynta dacwadda. Haddii aad u baahato kaalmo dhammaystirka foomkan, ama haddii aad jeclaan lahayd inaad samayso dacwad hadal ah, fadlan la xidhiidh Isu-duwaha ADA adiga oo wacaya (408) 321-2300. Foomka dhammaystiran waa in lagu soo celiyo Isu-duwaha ADA, 3331 North First Street, Building B-1, San Jose, CA 95134.

Dacwoodaha: Complainant:	Taleefanka: Phone:
Cinwaanka Jidka: Street Address:	Taleefan Kale: Alt Phone:
	Magaalada, Gobolka, SIP-Koodhka City, State, Zip Code
Qofka Diyaarinaya Dacwadda (haddii aanu ahayn Dacwoodaha): Person Preparing Complaint (if different from Complainant):	
Cinwaanka Jidka, Magaalada, Gobolka, SIP-Koodhka Street Address, City, State, Zip Code	

Taariikhda Dhacdada (Date of Incident): \_\_\_\_\_

Fadlan sharrax dhacdada takoor ee la soo eedeeyey, oo ay kujirto goobtu, haddii ay khusayso. Sheeg magacyada iyo mansabyada shaqaalaha VTA ee ku lug lahaa, hadday jiraan.

---

---

---

Ka sii Wad Bogga Xiga

Sharraxaadda dhacada sii socda:

---

---

---

---

---

---

---

Ma ka fayl garaysatay dacwad hay'ado kale oo fadaraal, gobol, ama deegaan? Haa/Maya (Mid Goobaab). Haddii ay sidaas tahay, ku tax hay'adaha iyo macluumaadka meesha lagala xidhiidhaya hoos:

---

Magaca Lala Xidhiidhaya  
Agency

Hay'adda  
Contact Name

---

Cinwaanka Jidka, Magaalada, SIB-Koodhka  
Street Address, City, State, Zip Code

Taleefanka  
Phone

---

Magaca Lala Xidhiidhaya  
Agency

Hay'adda  
Contact Name

---

Cinwaanka Jidka, Magaalada, SIB-Koodhka  
Street Address, City, State, Zip Code

Taleefanka  
Phone

Waxaan xaqiijinayaa inaan akhriyey eedaynta sare iyo inay tahay run inta aan ka ogahay, macluumaadka aan ka hayo, iyo sida aan u haysto.

---

Taariikhda Saxeexa  
Complainant's Signature

---

Dacwoodaha  
Date

---

Daabac ama Garaac Magaca Dacwoodaha  
Print or Type Name of Complainant

Taariikhda La Helay: \_\_\_\_\_

Date Received:

Helay: \_\_\_\_\_

Received By: